# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Hadal Qoraalka

**Opened:- 10:17 *AM*** **Hansard *No.*20/1** ***23/12/2012***

Kal-fadhiga 20aad Fadhigiis 2aad

**Dooda Ajendaha Kal-fadhiga 20aad waxay socotay hal maalin, waxaana ka qayb qaatey 13 mudane.**

1. **Md. Xasan Cawaale Caynaan:-** Marka hore shirgudoonka iyo Mudanayaasha waan salaamayaa Ajendaha waxaan leeyahay waa in lagu:-
   - ***Lagu soo daraa Xeerka Caasimada,*** waayo waa inagu ceeb inaynaan ilaa iminka lahayn xeer caasimadeed oo aynan sameyn, markaa waa in fadhigan inoo bilaabmey lagu ansixiyaa xeerkaa caasimada.
   - ***Komishanka Doorashooyinka waa in loo yeedhaa oo Qiimeynta Xaalada dalka ee Doorashooyinka*** wixii ka dhacay su'aalo ka weydiiynaa, madaama aynu nahay Golihii Wakiilada oo shacabka wakiil kanahay.
   - ***Waa in laga saaraa, Xeerka Saxaafada,*** waayo waxaa jirey xeer hore oo saaxafadeed oo dhaqan gal ah.
2. **Md. Muxumed Mataan Hoore:-** waad salaamantihiin shirgudoon iyo Mudanayaalba, Salaan ka dib, waxaan leeyahay Ajendaha kal-fadhigan waa inaan ku soo darnaa:-
   - ***Xaalada dalka waliba Doorashooyinkii iyo wixii dalka ka dhacey ee dad ay ku dhinteen,*** waa cidii masuuliyadaa lahayd loo yeedhaa, arrintaas waa mid meelkasta ka dhacdey oo dalka wada saameysay, markaa waa inaan wax ka nidhaahnaa oo ugu yaraan dadkeenii ina soo doortey tusnaa inaynu ka hadalney.
3. **Md. Maxamuud Jaamac Cilmi (Dable):-** shir-gudoonka iyo Mudanayaasha waan salaamayaa ugu horeyn, Gudoomiye horta waxaa fiican ooddo dhacameed sidey u kala sareeyaan baa loo kala guraaye, in sidii u kala muhiimsan yihiin loo kala kala horeysiiyo, oo xaalada taagan ee dalka wax laga yidhaahdo, markaa ajendaha waa in lagu soo daraa:-

- wixii doorashadii ka dhacey oo komishanka iyo cidii masuuliyadeeda lahayd loo yeedhaa, komishanka waa in xilka qaadis lagu sameeyaa iyagaa leh sababta waxaa dalka ka dhacey.
- ***Xeerka Caasimada in ajendaha lagu soo daraa*** waa laga maarmaan.
- ***sidoo kale Xeerka Saxaafada*** isna waa meesha laga saaraa ayaan leeyahay.

**4. Md. Cali Xasan Maxamed:-** Salaan ka dib, anigu waxaan leeyahay ajendahan oo marka la eego xeerar muhiima u badan waxaan soo jeedin lahaa in xeerarka qaarna laga saar, qaarna la isdaba mariyo, xeerna waan ku soo darayaa:-

- ***Xeerka Saxaafada waa in laga saaro ajendaha***, saxaafadu waxay u baahantahay tababaro iyo fund, waxa loogu soo darey garanmaayo, Xeer hore oo Saxaafadeedbaa jirey, hadii wax laga odhanayo waa dariiqii xeerkii hore loo maraa, saxaafaduna qaybka qaadataa, waxaana aaminsanahay inaan la isku waafaqsanayn iminka.
- ***Xeerka Asaasida Komishanka dib-uhabeynta shuruucda isna halaga saaro***, Goleyaal sharci-dejineed baa jira, garan mayo meeshuu kaga Golayaashaa kaga aadayo, markaa inta la islagaranayaayo wuxuu qabanayo iyo meeshuu baarlamaanka kaga aadayo waa in laga saaraa.
- ***Ha lagu soo daro***, Xeerka Xukuumadu soo gudbisey ee ***Xeerka Maamuuska Madaxweynahah iyo Ku-xigeenka*** oo ajendihii hore ku jirtey.
- Xaga kala horeysiinta, sanadka dhamaadkiisii baan ku jirnaa, Miisaaniyadiina waa diyaar oo la inoo keenayaa sidaan maqlayay, markaa ***ha loogu soo horeysiiyo Miisaaniyada 2013ka*** ansixinteeda halaga dhigo.

**5. Md. C/raxman Yuusuf Cartan:-** anigu waxaan leeyahay:-

- ***Arrinta doorashooyinka*** ah ee laga hadlay gaar ahaan komishanka waa mid loo baahan yahay iyadoo laba arrimood loo kala qaadayo oo kala ah in Goluhu dib u eegis ku sameeyo wixii dhacey oo shuruucda iyo xeerarka la eegno, tan labaad inaynu eegno wixii xumaadey iyo sidii loo maamuley, sidoo kale sidii khaladkaasi aanu dib ugu soo noqondoorashooyinka danbe u dhicin, waa inaan qiimeyn sameynaa, goluhu isagaa dadka ka wakiila, dadbaan ku dhintey wixii dhacey,

weynu ogeynu oo diiwaangalintii waa inagii laalney oo waxaa la leeyahay hadii diiwaangalin lagu galilahaa doorashada waxa dhacey may dhaceen,

- ***Xeerka Saxaafada isaga waan la qabaa Mudanayaasha in laga saaro***, xeerkaa maan fahmin, waa in xeer lagawada qeybqaatey oo saxaafadu ka qaybqaadatey oo transparent ah la keenaa hadii kale.

6. **Md. Jamac Xasan Aadan:-** shirgudoonka iyo mudanayaashaba waan salaamayaa
   - ***In qodobka kowaad laga dhigo xaalada dalka*** oo ay ugu horeyso doorashadii dalka ka dhacdey, waa in Komishanka kaliya aan loo yeedhine, Xukuumada iyo Komishanka oo wada socda loo yeedhaa.
   - **Xeerkii kala xadeynta Gobolada iyo Degmooyinka** isna waa lagu daraa, oo intaan doorashooyinka kale gaadhin la la hirgaliyaa Xeerkaa, xeerka caasimadana lama sameyn karo ilaa xeerka kala xadeynta Gobolada iyo Degmooyinka
   - **Xeerka Sasaafadana** waan ku raacsanahay mudanayaasha in laga saaro ajendaha.
   - Waa inaan tacsi u dirnaa dadkii naftooda ku waayay eheladoodii Samin iyo iimaan ilaahay ha ka siiyee wixii dhacey inta wax ka soo gaadheena ilaahay caafiyo.

7. **Md. Bashiir Tukaale:-** dhamaan shir-gudoonka, Mudanayaasha iyo Saxaafadaba waan salaamayaa. Ajendaha waxaan leeyahay waa in lagu daraa:-
   - **In Qiimeynta Xaalada dalka** ee Wixii dalka ka dhacey ee doorashooyinka, oo cidii masuuliyadaa lahayd lagala xisaabtamaa oo loo yeedhaa, waana inaan aad uga doodnaa dadka sida nabadgalyada u mudaharaadayay ee lalaayay, waana inaan tacsi gaadhsiinaa dadkii ku geeriyooday oo aan tacsi u dirayo, waana in inta kal-gadhigan lagu jiraa arrintaa la eegaa oo Guddiyo loo saaraa, oo ay Ajendaha ugu soo horeysaa.

8. **Md. Baar Siciid Faarax:-** shirgudoonka, mudanayaasha, saxaaafada iyo marti sharaftaba waan salaamayaa, intaanan ajendaha u galin waxaan tacsi u dirayaa dadkii ku geeriyooday mudaharaadkii dhacay intii wax ku noqotey ilaahay ha caafiyo, Ajendahana sidii mudanayaashii hore sheegeen waxaan :-

   - **Ka saarayaa Xeerka Saxaafada,** waayo qorshuu u baahanyahay, waxyaabo farabadan oo ka maqana wey jiraan.

   - **Waxaan ku dari lahaa Xaalada Qiimeynta dalka,** waana arrinkaa loogu horeysiiyaa oo waliba Cid loo saaraa, waayo wax weynbaa

dhacey, anigu cid eedeyn maayo, laakin waa arrinkaa sidey wax u dhaceen iyo qiimeynteeda ajendaha lagu soo daraa.

- **In Hay'adda laanta socdaalka in laga madaxbaneeyo Wasaarada Arrimaha Gudaha,** dadkii dhibaa ka haysta oo 3 bilood buu doonayaa qofkii muwaadinka ah inuu hello Wasiirkii, markaa waa in Hay'addaa la madaxbaneeyaa oo laga saraa Wasaarada arrimaha Gudaha, loona sameeyaa shuruudo adag.
- **Xeerka kala Xadeynta Gobolada iyo Degmooyinka waa ina lagu soo daraa,** hadii doorasho danbe dhacdo dhibaatoyinka jira waxaa ka mida kala xadeynta gobolada iyo degmoyinka, xeerka caasimada ee mudanayaashu ka hadleen isaga ilaa Kala xadeynta Gobolada iyo Degmoyinka la sameeyo lama sameyn karo.

9. **Md. Xuseen X. Ismaaciil:-** Gudoomiye waan salaamaya Shir-gudoonka iyo, arrintu waa kal-fadhiga 20aad maxaynu ka shaqeynaa oo qabanaa weeye, markaa waxaan leeyahay:-

   - Arrinta Qiimeynta wixii ka doorashadii lagu diiwaangalin la'aantaee aynu fasaxnay in faraha laga qaado oo diiwanglin la'aan lagu galo oo dadkii ku noqnoqdaan oo 20 jeer la codeeyo, markaa ceebta waa loo wada siman yahay, waxay ila tahay wixii qaranimada baabi'inaya inaa ka hortagno, oo maxay ku dhacday aynaan odhan ee sidii aanay dib ugu dhici lahayn sameynaa, aynu u yeedhno Komishanka inagoon canaan saareyn.
   - ***Xeerka Asaasidda Komishanka meesha halaga saaro,*** waayo laba gole ayaa jira oo hawshaa leh, dawlad baa jirta, markaa isaga inaga daaya.
   - ***Xeerka Kala xadeynta Gobolada iyo Degmoyinka isaga waa loo baahan yahay,*** markaa isagana waa in la helaa, waad mahadsantihiin.

10. **Md. Aadan X. Diiriye Dirir:-** Salaan ka dib waxaan anigu leeyahay waain:-

    - ***wixii qabyo ka noqdey ajendihii hore***, maalin walba kal-fadhigii furmaya waxaynu la nimaadnaa Ajende cusub isagoon kii hore dhamaanin, markaa waxaan leeyahay horta wixii kii hore ka qabyoobey ha lagu soo daro.

- ***Xeerka Saxaafada ha laga saaro Ajendahah***, uma baahna maanta saxaafu sharci lagu culeysiyo ee waxay u baahan tahay waxay aqoon iyo faa'ido u noqon kara.
- ***Xeerka Asaasida Komishanka habeynta shuruucda halaga saaro***, waa shaqadeenii.

- Ansixinta Xisaab xidhyada 2008,2009 iyo 2010, waxaan leeyahay maadaama aynaan sidey tahay loogu noqoneyn, wax dalka uga manfac roon aan gashano anagu waxaanu haynaa Xeerkii Kaluumeysiga markaa xeerarkaa dalku u baahanyahay waa inaan gashanaa.

11. **Md. Xamse Maxamed Gaadaweyne:-** ugu horeyn waxaan soo dhoweynayaa raga Golaha ku soo biirey, marka xigta waxaan leeyahay:-

- ***Qiimeynta Xaalada Dalka ee doorashooyinka iyo u yeedhista komishanka***, waxaynu maraynaa marxalad aad u hooseysa, markaa halka ha yimaadaan oo ka hadlaan.

- ***Xeerka Booliiska isna ma cada,*** Ma Xeerkii asaaskaa mise waa siyaasadii isna in laka cadeeyo ayuu u baahan yahay.

- Aynu u kala horeysiino sidey u kala muhiimsan yihiin, oo Miisaaniyada ansixinteeda marka la keeno aynu iyada ugu horeysiino.

12. **Md. C/raxman Cisman Caalin:-** mudanayaal waxaa muhiima inaynu dib u xasuusano Xeerarkii Golaha soo maray, waxaa ka mid ahaa laalistii Registrationka, uma baahnin ajendaha lagu soo daro komishanku arrimaha farsamada ee khaldamey in laga hadlo ama komishanka ha loo yeedho ama si kale ha looga hadlii wixii dhacey ee doorashada ka khaldamey in laga hadlo waa muhiim, oo waa inay xilkooda ku waayaan arrintaa komishanku.
    - Xeerarka yimaada waa in guddiyada ku shaqada leh loo dhiibaa, Wax ka badalka iyo Kaabistii Xeerka Qareenadas waa in guddida dib loogu soo celiyaa, mida kale guddidan halkan ayaynu ka ansixiney waa guddi jirta oo dastuuriya.
    - Xeerku markuu qabyo qoraal yahay ee gudiddu hayso maaha in ajendaha lagu soo daro sida ku qoran xeerarka booliiska iyo statisticska.
    - Waa in Xeerarka loo baahan yahanyahay ee baahida wayn loo qabo lagalaa oo aynu ansixinaa, markaa waa in Xukuumada laga dalbadaa, **Xeerkii Siyaasada Waxbarasha** iyo sidoo kale **Xeerka Caafimaadka** oo muhiimada kowaad la siiyaa sidii xeerarkaa loo helilahaa.

- **Xisaab xidhka isaga waan taageersanahay** in la keeno, waana loo baahan yahay.

13. **Md. Ibraahim Axmed Reygal:-** Gudoomiye waxan marka hore salaamayaa shir-gudoonka, Mudanayaasha iyo Saxaafada, marka anigu waxaan soo jeedinayaa ajenduhu wuu fiicanyahay, waxaan kaliye oo aan leeyahay:-

- In Ajendaha Marka lagu daro Xeerka Kaluumeysiga Sidiisaa lagu ansixiyo.

14. **Md. Axmed Ducaale Bulaale:-** marka hore waxaan leeyahay:-

- Xeerka Asaaska Komishanka dib u habeynta shuruucda waa in laga saaraa ajendaha
- Waa in lagu soo daraa, oo la helaa Xeerka Xaalufka Deegaanka oo aad loogu baahanyahay dalkii xaaluf ba'an baa lagu hayaa.
- Arrinta Xaalada Dalka, waxaan leeyahay Waa in laga hadlo oo Guddi loo saaro mudaharaadadii iyo waxyaabihii Doorashada ka dhacey oo cidii masuuliyadaaa lahayd loo yeedhaa.

**Gudoomiyaha:-** doodii intaasey inoogu dhamaatey, way mahadsanyihiin mudanayaasha ka qeyb-qaatey, Maanta iyo Bari Minuteska (Hansard) la isku soo ururinayaa, maalinta isniinta ee 25/12/2012 ayaan ajendaha u codeyn doonaa marka afkaarta mudanayaashu lagu soo daro, Fadhiguna wuu inoo xidhan yahay.

| | |
|---|---|
| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle** |
| **Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSl** |
| ------------------------------------------------------------ | ------------------------------------------------------- |